

JAMHUURIYADDA		SOMALILAND
<b>FAAFINTA RASMIGA AH</b>		
SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE		النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA E-mail: <a href="mailto:Garyaqaankaquud@gmail.com">Garyaqaankaquud@gmail.com</a>		
Sanadka: 5aad	Cadadka: 3aad ee march	Taariikh: 02/04/2016
QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.		
RUKUNKA (Subscription):		
QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.		

**TUSMADA CADADKA**

<b><u>QAYBTA KOWAAD: XEERARKA</u></b>	
<b>BAARLAMAANKA IYO XEER</b>	
<b>NIDAAMIYAYAASHA:</b>	
Sooma bixin	
<b><u>QAYBTA LABAAD: XEER</u></b>	
<b>NIDAAMIYAYAASHA IYO</b>	
<b>DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:</b>	
1) <b><u>XEER MADAXWEYNE</u></b> Lr: 0616/022016 Magacaabid	282
2) <b><u>XEER MADAXWEYNE</u></b> Lr : 0617/022016 Magacaabid	283
3) <b><u>XEER MADAXWEYNE</u></b> Lr : 0618/022016 Magacaabid	284
4) <b><u>XEER MADAXWEYNE</u></b> Lr : 0619/022016_Beddel	285
5) <b><u>XEER MADAXWEYNE</u></b> Lr : 0620/022016_Beddel	287
6) <b><u>XEER MADAXWEYNE</u></b> Lr : 0621/022016_Beddel	288

7) **XEER MADAXWEYNE** Lr : 0622/032016 289  
Magacaabid

8) **XEER MADAXWEYNE** Lr: 0624/032016 Magacaabid 290

**QAYBTA SADEXAAD: DIGREETOYINKA,**

**WAREEGTOOYINKA, AMARADA &**

**XEER NIDAAMIYAYAASHA**

**WASIIRADA, IWM**

Sooma bixin

**QAYBTA AFRAAD: AMARADA &**

**GO'AANADA MAAMUL**

9) Wareegto Garsoor oo ku saabsan Dacwadaha  
Idaariga ah **Maxkamada Sare** 291

10) Dhaqan Gelin Degreetadda Madaxweynaha  
**Maxkamada Sare** 295

11) Wareegto ku saabsan Dib uhabaynta Hanaanka  
Habraaca Cadaymaha Laxidhiidha Dhimirka 296

**Maxkamada Sare**

12) Amar u Madax Banaanayn Dhul Cabirkiisu  
Dhanyahay (75x48Mtr) **Maxkamada Gobolka  
M/Jeex** 301

13) Diiwaan Gelin Shirikada Global Development  
Company **Xafiiska Xeer illaalinta Guud** 307

14) Diiwaan Gelin Shirikada Dalmar Waasac Petroleum  
Co. 308


**Xafiiska Xeer illaalinta Guud**

15) Diiwaan Gelin Shirkada Yahama Trading Company  
**Xafiiska Xeer illaalinta Guud** 310


16) Diiwaan Gelin Shirikada Global Water Consulting  
**Xafiiska Xeer illaalinta Guud** 311

17) Diiwaan Gelin Shirikada Khaliif Trading Company  
**Xafiiska Xeer illaalinta Guud** 313

18) Diiwaan Gelin Shirikada Safe Energy Limited  
**Xafiiska Xeer illaalinta Guud** 314



19) Diiwaan Gelin Shirikada AL-Qudus Construction Company <b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	315
20) Diiwaan Gelin Shirikada Dhabase Construction Comapany <b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	317
21) Diiwaan Gelin Shirikada Greensom Engineering Solution <b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	318
22) Diiwaan Gelin Shirikada Toga Herer Trading Co. <b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	320
23) Diiwaan Gelin Tv Eryal Tv <b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	321
24) Diiwaan Gelin Magazine Hargeysa Service Guide <b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	323
25) Diiwaan Gelin Shirikada First AFG General Trading Co LTD <b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	324
26) Diiwaan Gelin Shirikada Hakika Cargo Service & Travel Agency LTD <b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	326
27) Diiwaan Gelin Shirikada Hoo Fish Company LTD <b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	327
28) Diiwaan Gelin Shirikada AL- Safa Consulting LTD <b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	329
29) Diiwaan Gelin Shirikada International Construction Company <b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	330
<b>QAYBTA SHANAAD: OGEYSIISYADA</b>	
<i>Sooma bixin</i>	



**QAYBTA KOWAAD:**

**XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER**

**NIDAAMIYAYAASHA:**

**QAYBTA LABAAD:**  
**XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO**  
**DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:**



**REPUBLIC OF**  **SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-3880/022016

DATE....29/02/16

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0616/022016**

**Magacaabid**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, xarafka (r) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda Wakiilada Somaliland u fadhiya dalalka dibeddu u leeyihiin Dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Wakiilka Jamhuuriyadda Somaliland u fadhiya Dalka Itoobiya;
- Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;
- Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Aaden Muuse jibriil, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wakiilka Jamhuuriyadda Somaliland u fadhiya Dalka Itoobiya.

Allaa Mahad Leh,  
Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



**REPUBLIC OF**  **SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-3882/022016

DATE....29/02/16

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0617/022016**


**Magacaabid**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, xarafka (j) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda Hay'adda Shaqaalaha Dawladu u leeyihiin Dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Gudoomiye ku-xigeenka Hay'adda Shaqaalaha Dawlada;
- Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;
- Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Maxamuud Cabdilaahi Xarbi, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Gudoomiye ku xigeenka Hay'adda Shaqaalaha Dawlada ee Jamhuuriyadda Somaaliland.



Allaa Mahad Leh,  
Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaaliland

**REPUBLIC OF**  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3883/022016

DATE....29/02/16

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0618/022016**

**Magacaabid**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, xarafka (kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaaliland;
- Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay Hay'adda Abaabul ka Saarka Qaranku u leedahay Dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Maareeyaha Hay'adda Abaabul ka Saarka Qaranka.
- Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;
- Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Ibraahim Axmed Raabi, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Maareeyaha Hay'adda Abaabulka Saarka Qaranka (NDC) ee Jamhuuriyadda Soomaaliland

Allaa Mahad Leh,  
Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



**REPUBLIC OF**  **SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-3884/022016

DATE....29/02/16

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0619/022016**

**Beddel**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Farqadiisa 3aad, Xarafka (kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay Agaasimayaasha Guud ee Wasaaraduhu u leeyihiin dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Agaasimaha Guud ee Wasaarada Kalluumaysiga iyo khayraadka Badda ee Jamhuuriyadda Soomaaliland;
- Markuu Ka fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;
- Markuu ku Qancay: In uu hanan karto xilkan loo magacaabay;

**Wuxuu Go'aansaday**

In Dr. Jaamac Maxamed Odowaa, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaarada Kalluumaysiga iyo khayraadka Badda ee Jamhuuriyadda Somaliland.



Allaa Mahad Leh,  
Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF**  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3885/022016

DATE....29/02/16

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0620/022016**

**Beddel**


**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Farqadiisa 3aad, Xarafka (kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda Ay Agaasimayaasha Guud ee Wasaaraduhu u leeyihiin iyo dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Xanaanada Xoolaha ee JSL;
- Markuu La Tashaday: Madaxda ay khusayso;
- Markuu ku Qancay: In uu hanan karo aqoon iyo kartina u leeyahay jagadan;

**Wuxuu Go'aansaday**



In Mudane, Cabdi Axmed Nuur (Cabdi Gurey), laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Xanaanada Xoolaha ee Jamhuuriyadda Somaliland.



Allaa Mahad Leh,  
Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF**  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3886/022016

DATE....29/02/16

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0621/022016**

**Beddel**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Farqadiisa 2aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda weyn ay Wasaaraduhu u leeyihiin Dalka iyo dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Wasiiru Dawlaha Wasaaradda Qorshaynta Qaranka iyo Horumarinta ee Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Ka fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;


Markuu ku Qancay:

In ay hanan karto xikan loo magacaabay;

**Wuxuu Go'aansaday**

In Mudane, Maxamuud Aaden Jaamac Galaal, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiiru Dawlaha Wasaarada Qorshaynta Qaranka iyo Horumarinta ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,  
Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



**REPUBLIC OF**  **SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-3886/022016

DATE....01/03/16

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0622/032016**

**Magacaabid**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay:

Qodobka 90aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay:

Qoraalka Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare ee MOE/HE/01/375-309/16 kuna taariikhaysan 11/01/2016;

Markuu Baaraandegey:

Xeer Hoosaadka Guddida Tacliinta Sare ee JSL;

Markuu Tixgaliyey:

Ahmiyadda Tacliinta Sare (Higher Education) u leedahay Dismaha Qaranka;

Markuu Arkay:

Hawlaha baaxada leh ee Guddida Tacliinta sare iyo baahida loo qabo in la magacaabo xubin cusub, isla markaana la buuxiyo xubinnimada uu banneeyey mudane, Siciid Maxamed Daahir ee Guddida Tacliinta Sare ee JSL;

### **Wuxuu Go'aansaday**

In Mudane, pro. Ismaaciil Muumin Aar laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado xubin ka tirsan Guddida Tacliinta Sare ee Jamhuuriyadda Somaliland.

In Mudane, pro. Axmed Muxumad Cumar, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado xubin ka tirsan Guddida Tacliinta Sare ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,  
Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3894/032016

DATE....01/03/16

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0624/032016**

**Magacaabid**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa Saad, xarafka (kh) ee Distoorka Qaranka;
- Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay Hay'adda Abaabul ka Saarka Qaranka u leedahay Dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Maareeye ku-xigeenka Hay'adda Abaabul ka saarka Qaranka
- Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;
- Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

### **Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Sacad Cabdi Cabdilaahi, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Maareeye Ku-xigeenka Hay'adda Abaabul ka Saarka Qaranka (NDC) ee Jamhuuriyadda Soomaaliland.

Allaa Mahad Leh,  
Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

## **QAYBTA SADEXAAD:**

**DIKREETOYINKA, WAREEGTOOYINKA,  
AMARADA & XEER NIDAAMIYAYAASHA**

**WASIIRADA, IWM:**

## **QAYBTA AFRAAD:**

**AMARADA & GO'AANADA MAAMUL**

**JAMHUURIYADA  
MAXKAMADDA SARE**



**SOMALILAND**



Supreme Court

**MS/GWMS/G-17/64/2016**

**Taar 27/04/2016**

Ku: Gudoomiyayaasha Gudiyada Dacwadaha Dhulka  
Gobolada JSL Fadhiyadoodada

ku: Dhamaan Garsoorayaasha Maxkamadda Sare JSL  
Hargeysa

Ku: Garyaqaanka Guud Ee Qaranka JSL Hargeysa

Og: Gudoomiyayaasha Golayasha Deegaanada  
Fadhiyadooda

Og: Ururada Qareenada (SOLLA – SOWLA) JSL Hargeysa

Og: Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL Hargeysa

Og: Xarunta Adeega Sharciga ee Jaamacada Hargeysa,  
Hargeysa

Og: Xarunta Adeega Sharciga ee Jaamacada Camuud  
Boorama


**UJEEDO: Wareegto Garsoor oo ku Saabsan**  
**Dacwadaha Idaariga ah**

**Gudoomiyaha Maxkamadda Sare JSL:-**

**Markuu Arkay:**

In Xeerka maamulka dhulka  
ee xeer 17/2001, uu  
dhagaysiga dacwadaha  
idaariga ah uu awood u  
siiyey gudiyada ka

garnaqista dacwadaha dhulka, go'aanada ay gudidaasi gaadhaana looga soo racfaan qaato maxkamada sare.



**Markuu Arkay:**

In Maxakamda Sare ay dacwadaha idaariga ah ay ku dhagaysato heerka darajada 2aad.

**Markuu Arkay:**

In Dacwadaha Idaariga ah ee racfaan ahaan ku soo gala maxkamada sare ay qaarkood u baahanyihiin in dib loo dhagaysto, sababo la xidhiidha dhinaca cadaymaha oo aan dhamaystirnayn darteed ama iyada oo mararka qaarkood loo baahan karo in dhinac kale oo aan hore dacwada ugu jirin la soo dhex galiyo

**Markuu Arkay:-**

in Dacwadaha Idaariga ahi u baahan yihiin in dhakhso go,aan kamadanbays ah looga gaadho. Hadii dib loogu celiyo gudidii hore uga garnaqdayna, ay taasi meesha ka saarayso ujeedadii laga lahaa ee

dhakhsaha ah, keeni  
kartana daahid ama jitan  
dacwadeed.



**Markuu Arkay:-**

qodobada 344,259(4)XHM,  
Iyo Asbaabta sare ku xusan  
darteed Gudoomiyaha  
Maxkamada Sare waxa uu  
soo Saaray Wareegtadan  
Garsoor:-

1. In dacwadaha Idaariga ah ee Maxkamadda sare ku soo gala Racfaan ahaan in Maxkamadda Sare ku dhagaysato heerka darajada 2aad sidoo kale qaban karo caddaymo, dhagaysan karto markhaatiyaal, soo dhex gelin karto dhinac kale.
2. Inaan dib loogu celin gudiyada ka garnaqa dacwadaha dhulka ee gobolada dalka dacwadaha dhulka ee ay hore u soo galeen.
3. Maxkamadda Sare ee JSL waa in ay go'aan kama danbays ah ka gaadhaa dacwadaha looga soo racfaan qaato, Go'aanada gudiyada ka garnaqa dacwadaha dhulka ee Gobolada dalka.
4. Waxa la soo saaray wareegtadan maanta oo ay taariikhdu tahay 27/1/2016.
5. Waxay wareegtadani dhaqan galaysaa maalinta uu soo saxeexo Gudoomiyaha

Maxkamada Sare JSL, isla markaana lagu  
faafiyo faafinta rasmiga ah.



**Aadan X.Cali Axmed**  
**Gudoomiyaha Maxkamada Sare JSL**  
**Ahna Gudoomiyaha Guddiga Cadaalada**

**JAMHUURIYADA**  **SOMALILAND**  
**MAXKAMADDA SARE**

Supre Court

---

MS/GMS/G-7/126/2016

20/02/2016

Ku:- DHAMMAAN HAY'DAHA FULIYA XEERARKA JSL

Ku: DHAMAAN GUDDOOMIYAYAASHA MAXKAMADAHA  
GOBOLADA DALKA

**FADHIGOODA.**

KU: DHAMAAN GUDDOOMIYAYAASHA MAXKAMADAHA  
DEGMOOYINKA DALKA

**FADHIGADOODA.**

KU: DHAMAAN GUDOOMIYAYAASHA MAXKAMADA  
RACFAANKA DALKA

**FADHIYADOODA.**



KU: DOOMIYAYAASHA GOLAHA DEEGAANADA DALKA OO  
DHAN



KU: DHAMAAN XEER ILAALIYAYAASHA GOBOLADA IYO  
DEGMOOYINKA DALKA

**FADHIYADOODA.**

KU; WASAARADDA ARIMAHA GUDAHA JSL  
HARGEYSA

KU: TALIYAHA CIIDANKA BOLISKA  
HARGEYSA

KU: SAXAAFADDA MADAXA BANAAN  
HARGEYSA


KU: WASAARADDA DEEGAANKA & HORUMARINTA REER-  
MIYIGA JSL

**Ujeedo:- Dhaqan Gelin Degreetadda**  
**Madaxweynaha.**

Tixraac xeerka madaxweynaha JSL ee sumadiisu tahay JSL/M/XERM/249,3178/04/2015, ee ku taariikhaysan 14.04/2015, kana hadlaysa joojinta isticmaalka bacaha iyo fayodhawrka deegaanka.

Hadaba waxa lala socodsiinayaa dhamaan hay'daha sharciga fuliya' in uu mid waliba qaato doorka uu ku leeyahay fulinta xeerka lagu mamnuucay

isticmaalka bacda iyo faydaha deegaanka, lana maxkamadeeyo cidkasta oo u hogaansami wayda xeerka lagu joojiyey isticmaalka iyo faydaha dhawrka deegaanka.



Allaa Mahad Leh.

Prof: Aadam X. Cali Axmed  
**Guddoomiyaha Maxkamada Sare ahna**  
**Guddoomiyaha Gudiga Caddaalada JSL**

**JAMHUURIYADA**  **SOMALILAND**  
**MAXKAMADDA SARE**

Supreme Court

---

**MS/GMS/G-7/150/2016**

**Date:- 01/03/016**

**Ku:** Dhamaan Gudomiyayaasha Maxkamadaha Degmooyinka JSL

**ku:** Dhamaan Garsoorayaasha Maxkamadaha Degmooyinka kala duwan Ee JSL

**ku:** Xafiiska Xeer ilaalinta Gobolada JSL

**Og:** Gudoomiyayaasha Maxkamadaha Gobolada JSL

**Og:** Gudoomiyayaasha Maxkamadaha Rafcaanada JSL

**Og:** Hayadaha Xuquuqal Insaanka Qaranka

**Og:** Hayadaha Xuquuqal Insaanka Heer Caalami (Human Right Watch)

**Og:** Xeerilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL

**Og:** Garyaqaanka Guud Ee Qaranka JSL

Og: Wasiirka Wasaarada Caddaalada JSL

Og: Gudida Caddaalada JSL



**Ujeedo: Wareegto ku Saabsan Dib u habaynta Hanaanka  
habraaca Cadaymaha Laxidhiidha Dhimirka**

**Mudanayaal,**


Distuurka jamhuuriyada Somaliland waxa uu sheegayaa in nafta aadamahu ay tahay deeq ilaahay waana qaali qof kastaana waxa uu xaq uleeyahay nolashiisa waxaanu ku waayi karaa oo kaliya marka maxkamad horteed uu kaga cadaado dembi uu xeerku jideeyey in dil lagu mutaysan karo sida ku cad qodobka 24(1), qofku waxa uu xaq uleeyahay in la nabad geliyo jidhkiisa, ciqaabta jidhka iyo waxyeelo kasta oo loo gaysto waanay reeban tahay sida ku cad qodobka 24(2)

Si lamid ah qof kastaa waxa uu xaq uleeyahay in la xurmeeyo sharaftiisa, sumcadiisa iyo noloshiisa gaar ahaaneed sida ku cad qodobka 24(3)

Denbiyada laga galo xuquuqda qofka sida xasuuqa, dil maxkamad la,aan ah, jidh dil iyo wixii la mid ah malaha mudo dhaaf 24(4).

Sidoo kale dastuurka jamhuuriyada Somaliland waxa uu ixtiraamayaa isla markaana dhawrayaa dhamaan, dhamaan xeerka iyo qawaaniinta caalamiga ah ee aan ka horimanayn dhaqanka iyo diinta suuban ee islaamka ah.

Dhinaca kale xeerarka xuquuqda aadamaha ee ICCPR iyo xeerka xuquuqal aadamaha ee Qaarada afrika ee kala ah (ICCPR iyo ACHPR) ayaa waxa si wada jir ah u dhawrayaan si wada jir ah.



Heshiiska caalamiga ah ee ilaaliya xuquuqda siyaasiga ah iyo ta bulsheed ee ICCPR waxa uu sheegayaa in aan qofna laga qaadi Karin xoriyadiisa aas-aasiga ah sifo aan waafaqsanayn xeerka sida ku xusan qodobka 9 ee ICCPR sidoo kale xeerka xuquuqal aadamaha ee Qaarada afrika ACHPR waxa uu sheegayaa in aan qofna lagama qaadi karo xoriyadiisa marka laga reebo sifo sharciga waafaqsan.

Sidaa daradeed baryahan danbe waxa socda qorshayaal dib u habayneed oo lagu hormarinayo habsami u socodka nidaamka maamulka maxkamadaha si ay u fududaato helitaan adeeg hufan oo tayo leh bulshadana kalsooni galin kara, Nidaamyadaas dib u habayneed oo horsedaya hirgelinta helitaanka nidaam habraac oo ka dhaqan gala maxkamadaha kala duwan marka ay bixinayaan adeega cadaymaha la xidhiidha dhimirka.

Sidaa daraadeed waxaynu lawada soconaa in ay jiraan goobo loogu tala galay in lagu hayo laguna xanaaneeyo dadka qaba xanuunka dhimirka, goobahaas oo baryahan danbe ay cabashooyin kamuujiyeen dadweynaha iyo hayadaha kala duwan ee xaquuqal aadamaha, cabashooyinkaas oo la xidhiidha in ay jiraan dad aan qabin xanuunka

dhimirka oo lagu hayo xarumahaas lagana cadayn xarun caafimaad xanuunkooda.

Waxa kale oo jirta in xarumahaas lagu hayo dadka in ay ka dhacaan tacadiyo ka dhan ah xuguuqda aadamaha, tacadiyadaas oo sababay in ay dhibaato jidh ahaaneed iyo mid maskaxeedba ka soo gaadho dadweynahaas.

Sidoo kale waxa jirta in marka ay maxkamaduhu bixinayaan adeegaas aanay jirin hanaan habraac, taasina waxay keentay in si fudud loo xidho dadyaw kala duwan oo aan maskaxda waxba ka qabin.

Sidaa daraadeed waxa la farayaa dhamaan gudoomiyeyaasha maxkamadaha degmooyinka in ay raacaan talaabooyinka soo socda marka ay bixinayaan adeega cadaymaha la xidhiidha dhimirka.

1. Waa in la horkeeno qofka qaba xanuunka dhimirka maxkamada horteeda
2. Waa in uu jiraa codsi kayimi ehelada qofka, lana soo cashuuro warqada codsiga ah
3. Waa in ay jiraan warqad cadaynaysa in uu qofkani qabo xanuunka dhimirka soona cadeeyeye dhakhtar takhasus u leh
4. Waa in ay jiraan ugu yaaraan saddex qof oo kamid ah ehelada qofka maxkamada horteeda lagu dhaariyo

5. Waa in gal loo furo, lambar la siiyo, laguna diwaan geliyo diwaan ugaara
6. Gudoomiyayaasha maxkamadaha degmooyinka waxa la farayaa in ay si joogta ah u booqdaan kuna kormeeraan xarumaha dhimirka ee ku yaala degmooyinka iyaga oo eegaya xaalada ay ku suganyihiin dadka qaba xanuunka dhimirka.
7. Hadii ay dhacdo in lagu xidho xarumaha dhimirka ama cilaajyada qof aanay ogolaan maxkamada degmooyinku hayntiisa ama xanaanayntiisa baadhis kabacdi waxa lafarayaa gudoomiyayaasha maxkamadaha degmooyinka in ay u soo gudbiyaan xafiiska xeerilaalinta gobolada JSL si looga qaado talaabo sharciga waafaqsan.

Sidaa daraadeed waxa si gaar ah loo farayaa dhamaan kaaliyayaasha sare ee maxkamadaha degmooyinka in ay si gaar ah u diwaan galiyaan cadaymahaas, sidoo kale waxa lagu wargelinayaa gudiga daba galka in ay hubiyaan dhaqangalka wareegtadan cidii fulin waydana baadhis kabacdi u soo gudbiyaan gudida caddaalada JSL

Wareegtadan waxa la soo saaray maanta oo ay taariikhdu tahay 01/03/2016

Prof: Aadam X.Cali Axmed  
Guddoomiyaha Maxkamada Sare, maxkamada dastuuriga ahna  
Guddoomiyaha Gudiga Cadaalada JSL

**JAMHUURIYADA**  **SOMALILAND**  
**MAXKAMADDA GOBOLKA M-JEEX/REGIONAL**  
**COURT**



**XAFIISKA GARSOORAHA**

**MGH/DFL/286/015**

**13/3/2016**

Ku: - Guddoomiya Degmada Ibraahim Koodbuur  
=Hargeysa=

Ku: - Taliyaha Saldhiga Boliska Ibrahim Koodbuur  
=Hargeysa=

Ku: - Xafiiska Gargaqaanka Guud  
=Hargeysa=

Ku: - Taliyaha Ciidanka Booliska JSL  
=Hargeysa=

Ku: Taliyaha Qaybta Galbeedka Boliska  
=Hargeysa=

Ku: Duqa Caasimada Hargeysa  
=Hargeysa=

Ku: Wasaarada Arrimaha Gudaha  
=Hargeysa=

Ku: - Xoghayaha Fulinta Dawlada Hoose...

=Hargeysa=



Ku: - Idaacada Radio Hargeysa

=Hargeysa=

Ku: - Jaraa'idka Madaxa Banaan

=Hargeysa=

Og: - Loofuliye: - Axmed Cismaan Aadan

=Hargeysa=

Qareen: Maxamed Daahir Guuleed

=Hargeysa=

Wakiil u yahay:- Suldaan Jaamac Cismaan Aadan

=Hargeysa=

Og:- lagu fuliye:- Cabdi C/laahi Guuleed

=Hargeysa=

**Ujeedo:- Amar U Madax Banaanayn Dhul  
Cabirkiisu Dhan yahay (75X48Mtr)**

Maxkamada Gobolka M/Jeex Hargeysa:-

Markay Aragtay:-

Gal dacwadeedka Fulinta ah  
ee sumadiisa iyo



dhinacyadiisuba sare ku  
xusan yihiin.

Markay Aragtay:-

heshiiska Nootaayo ee  
sumadiisu tahay  
Ref:QPN/478/04 ee ku  
taariikhaysan 20/12/2004.




Markay Aragtay:-

Arjiga codsiga Fulinta eek u  
taariikahaysan 2/10/2015  
ujeedadiisuna ahayd in lagu  
fuliyo Cabdi C/laahi uu ka  
iibiyey Dhulka Halka  
Baloodh ah Loo fuliyaha  
sare ku xusan kuna  
Damiintay Hanti uu  
leeyahay kuna dalbanayo in  
loo fuliyo heshiis iibka eek  
u sugmay Nootaayada sare  
ku xusan .

Maxkamada:-

waxa Qoraal Cadayn iib ah  
u soo gudbiyey Lagu fuliye  
Cabdi C/laahi Guuleed  
taariikhdu markay ahayd  
9/3/2016 Nuxurkeeduna  
ahaa in aanu shaki ku jirin  
in lagu fuliyuhu uu ka  
iibiyey dhulka cabirkiisu  
sare ku xusan yahay loo  
fuliyaha, sidaas awgeed uu  
Maxkamada ka codsanayo  
in loo madax banaaneeyo

loona fuliyo loo fuliyaha  
codsiga fulinta ah ee uu  
usoo gudbiyey Maxkamada



Markay Aragtay:-

warqada kala wareejinta  
Hantida Ma guurtada ah ee  
sumadiisu tahay 504/04  
kuna taariikhaysan  
10/4/2005 kana soo baxay  
xafiiska xarunta maamulka  
Dawlada Hoose ee Hargeysa.  
Iyo dhamaan waraaqaha  
cashuuraha Dawlada Hoose  
eek u waajibtay dhulkan  
intii u dhaxaysay 2005 ilaa  
2015, maxkamdu waxay u  
aragtay in dhamaan  
documentiyadaasi ay yihiin  
mid waafaqsan qod.388XM  
oo ah xuquuq ku sugantay  
qoraal.

Markay Deristay;-

Qoraalka uu u soo gudbiyey  
lagu Fuliyuhu maxkamada  
ee ah in iibkii uu hore ugaga  
iibiyey dhulka Loo Fuliyaha  
uu Ansax ahaa isla  
markaana aanu waxba ka  
qabin hadii loo madax  
banaaneynayo, Maxkamadu  
Go'aankan waxay u argtay  
Mid waafaqsan qod.405XM.  
oo ah in lagu fuliyuhu uu

sameeyey qirasho ikhtiyaari ah. Taasi oo xujo ku noqonaysa isaga lehna ahmiyad qaanuun.



Markay Deristay:-

in Xaquuqda sharci ee iibsadaha ay tahey inuu si maadi ah gacanta ugu hayo dhulka uu ka iibsaday lagu fuliyaha “iibiye” Mulkiyada oo ay ka dhalanayso tasarufka iyo intifaacsiga dhulka lakala iibsaday, si waafaqsan  
qod.681,682,(2,3)XM.

Markay Deristay:-

waajibaadka sharci ee lagu fuliyaha “iibiye,, inay tahey inuu ku wareejiyo dhulka uu ka iibiyey loo fuliyaha iyo inaanu ku kicin wax lidi ku ah wareejinta lahaanshaha ama mulkiyada dhulka uu hore uga iibiyey loo fuliyaha sida ku xusan qod.  
425,428XM.

Markay Aragtay:-

Codsiga Madax  
Banaanaynta ee uu  
Maxkamada usoo gudbiyey  
Qareenka Wakiilka Loo  
Fuliyaha taariikhdu markay  
ahayd 13/3/2016 kuna

dalbanayo In loo fuliyo  
dhulka Cabirkiisu sare ku  
xusan yahey.



Markay Aragtay:-

Asbaabta sare ku xusan iyo  
Qodobada  
272,277,292,343,338,350,4  
29,XHM. Sidaa daraadeed  
waxay soo saartay  
Amarkan:-

### **Amarka Maxkamada.**

1. Maxkamadu waxay u Madax banaanaysaa loo fuliye Axmed Cismaan Aadan wakiil u yahey Suldaan Jaamac Cismaan Aadan Dhulka Cabirkiisu dhan yahey 75x48Mtr, Dhulkaasi oo ku yaala Degmada Ibraahim Koodbuur,, jihooyinkiisuna kala yihiin Bari, Waddo, Waqooyi, Waddo, Koonfur Waddo, Galbeed, Waddo.
2. Sidaas Darteed Waxa La Farayaa Taliyaha Saldhiga Booliska Ibraahim Koodbuur Ina ay u Madax banaan yahey Dhulkaas Cabirkiisa Iyo Jihooyinkiisuba sare ku xusan Yahey Loo Fuliyaha Magiciisu yahey Axmed Cismaan Aadan wakiilna u yahay suldaan Jaamac Cismaan Aadan laga Bilaabo Maanta Oo Ay Bishu Tahay 13/3/2016, In ay sifo kasta Oo sharci Ahna U Isticmaali karo Dhulkaas. Isla Markaana Cidii ka Hor Timada Amarkan la Horkeeno sharciga.

3. Wuxuu soo baxay Amarkani Madax-banaanaynta ahi maanta oo taariikhdu tahay 13/03/016...
4. Xaqsoore waa alleh



**(yusuf Jaamac Geelle)**

**GARSOORAHA MAXKAMADA GOBOLKA M/JEEX**

**=HARGEYSA=**

**JAMHUURIYADDA  SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

XIG/JSL/41/2016.

17/02/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, GLOBAL DEVELOPMENT COMPANY, oo ay ku cadyihiin xubnaha shirkaddu, sida ku cada qodobka

11aad (2) (a) Somaliland Company law.



**Markuu Arkay:** - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay suganyihiin.

**Markuu arkay:** - Saxeexa saamilaydda ay sexeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay” **GLOBAL DEVELOPMENT COMPANY Astaanteeduna tahay:- (Magaca Shirkada oo la soo gaabiyay)** shaqadeeduna tahay soo Dejinta iyo dhoofinta Allaabooyinka **(Import and Export)**, xarunteeduna tahay Magaaladda hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 17/02/2016

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

**JAMHUURIYADDA**



**SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**


XIG/JSL/42/2016.

17/02/2016

Hargeysa

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed



Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, DALMAR WAASAC PETROLEUM CO, oo ay ku cadyihiin xubnaha shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

**Markuu Arkay:** - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay suganyihiin.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilaydda shirkadu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **DALMAR WAASAC PETROLEUM CO, Astaanteeduna tahay: - (Xarfaha DWPC)**, shaqadeeduna tahay Soo Dejinta Shiidaalka (Fuel Importation), xarunteeduna tahay Magaaladda

Burco, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay  
17/02/2016

Allaa Mahad Leh

(Xasan Axmed Aadan)



**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

**JAMHUURIYADDA  SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

XIG/JSL/43/2016.

17/02/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

**Ujeeddo:- Diiwan Gelin.**

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka jamhuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwan galinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha .

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, YAHAMA TRADING COMPANY, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

**Markuu arkay:** - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer



NO.25/2004 Company Act of  
Somaliland, samiyadooduna ay  
suganyihiin.



**Markuu arkay:** - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay  
saxeexeen sida uu qabo qodobka  
11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer  
Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay  
Shirkada magaceedu yahay, **YAHAMA TRADING  
COMPANY, Astaanteeduna tahay: (Magaca Shirkada),**  
shaqadeeduna tahay soo Dejinta iyo Dhoofinta  
Allaabooyinka (Import and Export), xarunteeduna tahay  
Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay  
taariikhdu tahay 17/02/2016

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

**JAMHUURIYADDA**  **SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

XIG/JSL/45/2016.

21/02/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha  
**(Sole Proprietorship)**



**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u simaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, GLOBAL WATER CONSULTING.

**Markuu Arkay:-** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **GLOBAL WATER CONSULTING, Astaanteeduna tahay: - (Dhibic Biyo ah oo soo Dhacaysa),** shaqadeeduna tahay **(Water Sanitation Consulting),** xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 21/02/2016

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD 

XIG/JSL/46/2016.

21/02/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.  
**(Sole Proprietorship)**

**Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, KHALIIF TRADING COMPANY.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **KHALIIF TRADING COMPANY, Astaanteeduna tahay: - (Magaca Shirkada oo dhexda ugu jirto xasiid)** shaqadeeduna tahay libinta raashinka iyo Bagaashka Jumladle (**Wholesaler**), xarunteeduna tahay Magaaladda Gabilay, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 21/02/2016

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka.**

**JAMHUURIYADDA  SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

XIG/JSL/47/2016.

28/02/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

**Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed**

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.  
**(Sole Proprietorship)**

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay,  
SAFE ENERGY LIMITED

**Markuu Arkay:-** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay:** - Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay SAFE ENERGY LIMETED, **astaanteeduna tahay: - (Magaca Shirkada)** shaqadeeduna tahay soo Dejinta Allaabooyinka (**Import and Export**) xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 28/02/2016.

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

**JAMHUURIYADDA**  **SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

XIG/JSL/48/2016.


24/02/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

## Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.



### **(Sole Proprietorship)**

**Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, AL-QUDUS CONSTRUCTION COMPANY.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

## Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **AL-QUDUS CONSTRUCTION COMPANY Astaanteeduna tahay:- (Dhisme Magaca Shirkadu Ku dhex qoran yahay Cadceedna Ka danbayso)** shaqadeeduna tahay Dhismaha (Construction), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 24/02/2016

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**



**JAMHUURIYADDA**  **SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

XIG/JSL/49/2016.

28/02/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.  
**(Sole Proprietorship)**

**Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, DHABASE CONSTRUCTION COMPANY.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka

11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer  
Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y



Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay  
Shirkada magaceedu yahay **DHABASE CONSTRUCTION  
COMPANY, Astaanteeduna tahay (Dube iyo Manjarafad  
Magaca Shirkadu Ku dhex qoran yahay)** shaqadeeduna  
tahay Dhismaha (**Construction**), xarunteeduna tahay  
Magaaladda Caynabo, laga bilaabo maanta oo ay  
taariikhdu tahay 28/02/2016

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

**JAMHUURIYADDA**  **SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

XIG/JSL/63/2016.

13/03/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

**Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed**

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda  
Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**(Sole Proprietorship)**

**Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer  
Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya



Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay  
Diiwan geliso Shirkadaha

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay,  
GREENSOM ENGINEERING  
SOLUTION



**Markuu Arkay:-** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan  
yahay Xeerka Shirkadaha Xeer  
NO.25/2004 Company Act of  
Somaliland.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu  
saxeexay sida uu qabo qodobka  
11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer  
Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay  
Shirkada magaceedu yahay **GEREENSOM  
ENGINEERING SOLUTION. Astaanteeduna tahay:-**  
(Farawaxada Sare u taagan magaca Shirkaduna ku hoos  
qoran yahay) shaqadeeduna tahay latalinta xaga  
farsamada laydhka **(Engineering Consultant)**  
xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo  
maanta oo ay taariikhdu tahay 13/03/2016.

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/64/2016.

14/03/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**(Sole Proprietorship)**

**Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkad aha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, TOGA HERER TRADING CO.

**Markuu Arkay:-** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland,

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **TOGA HERER TRADING CO. Astaanteeduna tahay** :- ( xarfaha TH isku dhex jira) shaqadeeduna tahay Soo dejinta Alaabooyinka **(Import)** xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 14/03/2016.

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

**JAMHUURIYADDA**  **SOMALILAND**  
**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

XIG/JSL/66/2016.

19/03/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

**Ujeedo:- Diiwaan Gelin TV**


Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Saxaafada dalka.

**Markuu arkay:-** Qodobka 32 ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

**Markuu arkay: -** Qodobka 6aad, iyo 7aad ee Xeerka Saxaafadda Xeer Lam.27/2004.

**Markuu Arkay:-** warqada Ogolaanshaha ee Wasaaradda Warfaafinta

sumadeeduna tahay  
WWW/XW/08/03/2016 ee ay ku  
ogolaatay in loo diiwaan geliyo Tv-ga  
ERYAL Tv.



**Markuu arkay:-**

Codsiga u soo qortay mulkilaaha TV-  
ga kuna codsanaayo in loo diiwaan  
geliyo TV-gan, isaga oo balan qaadaya  
dhinaciisa in uu u hogaansami doono  
Xeerka Saxaafadda iyo Xeerarka kale  
ee Dalka JSL.

Wuxuu Caddeynayaa

Inuu si Sharci ah uga diiwan gashan yahay Xafiiskan Tv-  
ga Magaciisu yahay **ERYAL TV**, Shaqadiisuna tahay soo  
deynta wararka iyo Barnaamijyadda horumarinta  
Bulshada, xaruntiisuna tahay Magaaladda Hargeysa,  
Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL**

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

XIG/JSL/67/2016.


19/03/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

**Ujeedo:- Diiwan Gelin Magazine**

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Saxaafada dalka.



**Markuu arkay:-** Qodobka 32aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

**Markuu arkay: -** Qodobka 6aad, iyo 7aad ee Xeerka Saxaafadda Xeer Lam.27/2004.

**Markuu Arkay:-** warqada Ogolaanshaha ee Wasaaradda Warfaafinta sumadeedu tahay WWW/XW/08/03/2016 ee 16/03/2016 ay ku ogolaatay in loo diiwaan geliyo Magazine magaciisu yahay Hargeisa Services Guide.

**Markuu arkay:-** Codsiga u soo qortay mulkiilaha Magazine-ka kuna codsanaayo in loo diiwaan geliyo Magazine-ka, isaga oo balan qaadaya dhinaciisa in uu u hogaansami doono Xeerka Saxaafadda iyo Xeerarka kale ee Dalka JSL.

Wuxuu Caddeynayaa.

Inuu si Sharci ah uga diiwan gashan yahay Xafiiskan Magazine-ka Magaciisu yahay **HARGEYSA SERVICE GUIDE**, Shaqadiisuna tahay xaysiisyadda, kuna soo bixi doona luuqada Englishka, xaruntiisuna tahay Magaalada Hargeysa,

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL**

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD 

XIG/JSL/68/2016.

19/03/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, FIRST AFG GENERAL TRADING CO.LTD, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2)(a) Somaliland Company law.

**Markuu Arkay:-** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay suganyihiin.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka

11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer  
Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliyey.y**

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **FIRST AFG GENERAL TRADING CO LTD, Astaanteeduna tahay :-(xarfaha AFG oo goobo ku dhex jira)**, shaqadeeduna tahay soo dejinta Allaabooyinka (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 19/03/2016.

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL**

**JAMHUURIYADDA  SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

XIG/JSL/69/2016.

20/03/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

**Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed**

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer

Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.



**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, **HAKIKA CARGO SERVICE & TRAVEL AGENCY LTD**, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

**Markuu Arkay:-** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay suganyihiin.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **HAKIKA CARGO SERVICE & TRAVEL AGENCY LTD**, **Astaanteeduna tahay :-**(map-ka aduunka oo ay ka hooseeyaan diyaarad, baabuur weyn iyo markab), shaqadeeduna tahay Bixinta Adeegyadda Socdaalka (Travel and Truism Service), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 20/03/2016.

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL**



JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/70/2016.

20/03/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, HOO FISH COMPANY LTD, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2)(a) Somaliland Company law.


**Markuu Arkay:** - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland Saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:** - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **HOO FISH COMPANY LTD**

**Astaanteeduna tahay:-** ( Kallun magaca shirkadu ku dul wareegsan yahay), shaqadeeduna tahay dhoofinta Kallunka (Export) xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 20/03/2016.



Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL**

**JAMHUURIYADDA**  **SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

XIG/JSL/71/2016.

19/03/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

**Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed**

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, AL SAFA CONSULTING LTD, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida

ku cad qodobka 11aad (2) (a)  
Somaliland Company law

**Markuu Arkay:-**

In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay: -**

Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **AL SAFA CONSULTING LTD, Astaanteeduna tahay:- (Magaca Shirkada),** shaqadeeduna tahay Bixinta adeegyadda la talinta xaga maaliyadda (Consulting), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 19/03/2016.

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL**

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

XIG/JSL/72/2016.

20/03/2016

Hargeysa.



Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.  
**(Sole Proprietorship)**

**Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Maga ceedu yahay, INTERNATIONAL CONSTRUCTION COMPANY,

**Markuu Arkay:-** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **INTERNATIONAL CONSTRUCTION COMPANY, Astaanteeduna tahay:- (Xarfaha ICC oo ku jira goobo afar geesa),** shaqadeeduna tahay Dhismaha (Construction), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 20/03/2016.

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL**

